TIPS FOR PARENTS

EQAO Testing

Imtixaanka Hay'adda EQAO

Waa maxay EQAO maxaase ardayda loogi imtixaamaa?

EQAO waa xafiiska gobolka u qaabilsan Tayada Waxbarashada iyo Kormeerkeeda. Waa hay'ad madaxbanaan oo ay abuurtay dowladda si ay u dejiso una kormeerto imtixaanaadka ku aadan dhinaca qoraalka, akhrinta iyo xisaabaadka heerka ay ka taaganyihiin ardayda dhigata fasallada 3, 6, 9, iyo 10 aad ee gobolka Ontario .

Imtixaankani wuxuu waalidka, macallimiinta, maamuleyaasha, iyo hantidhowreyaasha iskuulaadkaba u muujinayaa halka ay ardaydani ka gaareen waxbarashada iyo halka ay ka sugaysay guddoonka waxbarashada in ay ka gaareen dhinaca akhrinta, qoraalka iyo xisaabta.

Natiijada imtixaanka maxay tilmaameysaa?

Natiijada waxay kuu muujinaysaa heerka waxbarashada uu canuggaada ku beeganyahay sida:

Heerka 1aad - qiyaastii 50% ilaa 59% ama "D"
Heerka 2aad - 60% ilaa 69% ama "C"
Heerka 3aad - 70% ilaa 79% ama "B"
Heerka 4aad - 80% to 100% ama "A"

Ardayda u fariisata imtixaanka fasalka 10aad ee qoraalka iyo akhrinta natiijadooda waxay noqonaysaa baasid ama dhicid.

Natiijadan ma ka mid noqonaysaa kuwa ku qoran buuga waxbarashada ardayga?

Natiijooyinka imtixaanka fasallada 3aad iyo 6aad kuma qormayaan buuga waxbarashada ardayga sidaa darted wax uma dhimaayaan aayaha waxbarashada ardayga. Natiijada imtixaanka xisaabta ee fasalka 9aad ayaa ilaa 10% ka mid noqonaayo dhibcaha tilmaamayo waxbarashada ardayga ee ku qoran buugiisa. Hase- yeeshee, ardayga si uu u qaato Shahaadada Dugsiga Sare ee Ontario waa in uu ku baaso imtixaanka Qoraalka iyo Akhrinta ee fasalka 10aad ama koorsooyinka waxbarashada qoraalka iyo akhrinta.

Sideen ugu diyaariyaa canuggeyga imtixaankan?

Diyaarin u gaar ah imtixaankan ma jirto. Macallimiinta qaar ayaa bixiyo su'aalo tijaabo ah si ardayga uu uga qaato tusaale habka uu imtixaankani u egyahay. Sida ugu haboon oo aad canuggaada u caawini kartid waa adigoo hubiya in uu canugga helo nasasho fiican iyo in uu waqti hore u tago iskuulka.

Ardayda dhigata fasalka ESL ma ka qeyb galaan imtixaankan?

Haa, inkastoo ardaydan dhigata fasalka ESL qaarkood laga cafiyo imtixaanka haddii ay kol dhow waddanka Kanada soo galeen. Qaar kale "howl-fududeyn" ayaa loo sameeyaa sida ayagoo la siiyo waqti badan oo ay ku diyaariyaan imtixaanka, meel deggan looga qaado ama loo sameeyo qof u akhriya tilmaamaha iyo su'aalaha. Maamulaha dugsiga waa in uu la tashado waalidka haddii canugga loo sameynayo howl-fududeyn ama laga cafinayo imtixaanka.

Ardayda baahida gaarka ah qabta ayaguna ma ka qeyb galayaan imtixaankan?

Ardayda oo idil waxaa lagu gubaabiyaa in ay imtixaankan ka qeyb galaan hasayeeshee qaar ka mid ah ardayda baahida gaarka ah qabta waa laga caffin karaa imtixaankan. Badanaa ardayda noocan ah waxay leeyihiin Qorshaha Waxbarashada ayaga u Gaarka ah (IEPs) oo qeexayo 'howl-fududeyntooda" ama "taakuleyntooda" si ay ugu hormaraan iskuulka. "howl-fududeynta" waxay ka caawinaysaa ardayga in uu si sahlan imtixaanka EQAO uga qeyb galo.waxaan ka mid ah sida ayagoo la siiyo waqti badan oo ay ku diyaariyaan imtixaanka, meel deggan looga

people for Education
BECAUSE EDUCATION MATTERS MOST

Copies are available in several languages at *www.peopleforeducation.com.*
For more information, call 416-534-0100 or email: *info@peopleforeducation.com*
© People for Education 2009
The Ontario Trillium Foundation
La Fondation Trillium de l'Ontario
toronto community foundation

EQAO Testing

qaado ama loo sameeyo qof u akhriya tilmaamaha iyo su'aalaha.

Maamulaha dugsiga waa in uu la tashado waalidka haddii canugga loo sameynayo howl-fududeyn ama laga cafinayo imtixaanka.

Ardayda luqadda Fransiiska wax ku barata ayaguna ma ka qeyb galayaan imtixaankan?

Maamulka iskuulaadka waxay dooran karaan in ardayda fasalka 3aad dhigata ee iskuulaadka Fransiiska wax lagu barto ay ka qaadaan imtixaanka xisaabta ah qeybtiisa Fransiiska oo keli ah kaddibna natiijada xisaabta oo keli ah loo tixgeliyo, ama waxay fari karaan in ardaydani ay ka qeyb galaan imtixaanka xisaabta qeybtiisa Fransiiska iyo imtixaanka qoraalka iyo akhrinta luqadda Ingiriisiga ahba.

Ardayda fasalka 6aad dhigata ee iskuulaadka Fransiiska wax lagu barto waxaa laga sugayaa in ay ka qeyb galaan imtixaanaadka oo idil asagoo afka Ingiriisiga ah, inkastoo ay isticmaali karaan qaamuuska gaaban oo labada luqadoodba ku fasirayo macnaha xisaabta.

Sidee loo isticmaalaa natiijada?

Macallimiinta iyo maamuleyaasha waxay heleyaan natiijada ku aadan ardayda sida ay uga soo baxeen imtixaankii ahaa akhrinta, qoraalka iyo xisaabta. Haddii ay dhacdo in arday badan ay ku dhacaan qeyb imtixaanka ka mid ah, macallimiinta waxay isku dayi doonaan in ay barashada qeybtaasi aad u horumariyaan ama u helaan xeelado kale oo lagu caawini karo horumarka ardayda. Haddi ay dhacdo in iskuulaad badan ardaydooda ay ku dhacaan imtixaanka, guddoonka waxbarashada wuxuu dareemayaa in iskuulaadka oo idil ay u baahanyihiin in mad-habka waxbarashada wax laga beddelo si loo horumariyo ama loo helo xeelado kale. Waalidka waxay natiijada helayaan xilliga dayrta ah. Natiijooyinka waxaa loo dirayaa iskuulka uu ardayga imtixaanka ku galay, iskuulkana wuxuu u qeybinayaa ardayda kan maqan iyo kan joogaba.

Halkeen ka helayaa warbixin dheeraad ah?

Shabakadda internetka ee EQAO oo ah *www.eqao.com* waxaa laga helayaa jawaabo badan, imtixaano tusaalooyin ah, iyo jawaabtooda.

people for Education
BECAUSE EDUCATION MATTERS MOST

People for Education is an independent parents' group working to support public education in Ontario's English, French and Catholic schools.

You can reach us at: P.O. Box 64, Station P, Toronto, Ontario, M5S 2S6
Phone: 416-534-0100 • fax: 416-536-0100 • email: *info@peopleforeducation.com* or *visit: www.peopleforeducation.com*